Qore: Faarax Maxamuud Maxamed

# Ilays

21 June 2020

***Hablihii ugu horeeyey ee Iskuulkii Burco (Burco Girls School) Bilaabay.***

## Milicsiga Waxbarashadii British Somaliland



Burco Girls School

Taariikhldan kooban ee aan ugu magac daray **"Ilays**," waxa aynu ku eegaynaa taariikhdii waxbarasho ee wakhtigii Ingiriisku Somaliland xukumayey, gaar ahaan hablihii ugu horeeyey ee iskuul dhigta. Inkasta oo aynu bilowgii waxbarashada iyo khilaafkii dheeraa ee shacabka iyo Ingiriiska soo dhex maray aynu gogol dhig uga dhigayno, hadafka qoraalkani waxa uu diiradda saarayaa, halgankii waxbarashada hablaha loo soo maray iyo iskuulkii ugu horeeyey Burco Girls School (Iskuulkii Hablaha Burco).

Intii aanay gumeystayaashii Yurub dhulka Soomaalida imaan, waxbarashada keliya ee jirtay waxa ay ahayd midda quraanka, taas oo weliba ku koobnayd wiilasha. Waxana ardaydu ay baran jireen qoraalka iyo xaafidaadda Quraanka. Marka ardaygu Quraanka dhammeeyona, tacliinta ka sii saraysa ee uu sii bartaa waxa ay ahayd in macalin Diimeed noqdo. Qaarkood waxa ay aad u sii dhex geli jireen cilmiga Suufiyadda oo ahayd hab waxbarasho oo habaysan taas oo uu ardaygu si fiican u sii baran jirey falsafadda iyo Dariiqada uu ku xidhiidho, ha ahaato Qaadiriya ama Axmediya (Saalixiya ayaa markii dambe loo yiqiin). Ragga culimada noqday ee Dariiqada ay ku xidhnaayeen ka aflaxay, ma ahayn rag aqoon maadiya oo waxa ay barteen ka duwan u hanweyn ama raadsada.

Markii Ingiriisku Dhulka Soo galay (British-Somaliland), waxa raggii Ingiriiska ahaa ee maamulka waday is tuseen in Soomaalidu aanay ahayn dad aan han waxbarasho lahayn oo raba noloshooda iyo Diintoodu ay sidooda u ahaadaan. Waxana ay isweydiiyeen, maadaama ay iyagu hadda dadkii ka mas'uul yihiin in ay waxbaraan ama sidooda ku dhaafaan. Inta badan,

Ingiriisku waxbarashada dadyowga uu gumeysto waxa uu u arkayey mid xukunkiisa anfici doonta ha ahaato, shaqo ama aragti iyo dhaqan kiisa ku qanacisaba.

Hase ahaatee, waaya aragnimada Ingiriisku uu u lahaa waddamo badan oo uu gumeystay sida Hindiya, Suudaan, Masar iyo bulshooyinkii kale ee ka kacdoomay tacliintiisa si aanu dhaqankooda iyo diintooda u fara gelin. Sidaas darteed, isaga oo Ingiriisku maamulkiisa markii ugu horeysay ku koobay dhulka xeebta ah sida magaalada Berbera iyo Bulla Xaar, tacliintase kuma degdegin. Muddo ka dibse, dhulka Xeebeedka Somaliland iskuulkii ugu horeeyey waxa laga furay magaalada Berbera sanadkii 1898, waxa kale oo 1905 iskuulo kale laga furay magaalooyinka Bulla Xaar iyo Saylac.

Mudadaas iskuuladaasi furaayeena waxa qiyaastii dhiganayey ilaa 150 arday, hase ahaatee, caruurtaasi waxa ay badankoodu ahaayeen Carab iyo Hindi oo ahaa caruurtii ay dhaleen Carabtii iyo Hindidii Ingiriiska u shaqaynayey. Sida wadamada kale ee Ingiriisku gumeystay ay welwelka uga muujiyeen ujeedada waxbarashada gumeysiga, Soomaalidu waxa ay ciyaalkooda uga baqayeen in laga gaaleeyo ama dhaqankooda laga bedelo. Sidaas darteed ayey wadaadada iyo waalidiintuba uga soo horjeedeen, ninkii caruurtiisa iskuul "gaalo" maamusho geeyana waxa bulshadu u arkaysay nin Diintiisii iyo Dhaqankiisii meel uga dhacay.

In kasta oo cabsidaas gaalaynta Soomaalidu aad werwer ugu haysay, haddana damaca Kaniisaduhu ma yarayn in dhulka gumeystuhu qabsaday ay hawsha Kaniisadda gaadhsiiyaan. Sidaa darteed, sanadkii 1891kii ayaa Kaniisadda Kaatoliggu iskuulkii ugu horeeyey ay ka furtay magaalada Berbera. Hase ahaatee, waxaa dagaal weyn kala soo hor jeestay wadaadadii reer Berbera. Ka dibna, waxa Kaniisaddii Khasab ku noqotay in ay iskuulkii xidho sanadkii 1910kii.

Cadaadiskaa ay qolyaaha Kaniisaddu Soomaalida kala kulmeena waxa ay xukuumaddii Ingriisku ay qaadatay go'aan ah, in ay Somaliland ka madax banaanato in diinta Kiristaanka lagu faafiyo, isla markaana waxa uu maamulkii hor joogsaday in Kaniisaduhu iskuulo diimeed ka furtaan Somaliland. Sharciyadaas Kaniisadaha lagaga hor joogsanayo in ay iskuulo ama diin faafin ka furtaan Somaliland waxa maamulkii Boqortooyadu mar kale sii xoojiyey sanadihii 1919 iyo 1927kii.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, sanadkii 1934kii ayaa Baaderiga Kaniisadda Angalikaanka ee Masar iyo Suudaan maamulkii British Somaliland ka codsaday in xayiraadda kaniisadaha laga qaado si ay Somaliland ugu soo noqdaan; laakiin,

maamulihii British Somaliland ee markaas Sir Arthur Lawrence ayaa ku adkaystay in aanu xayiraaddaas qaadi karin arrimo nabad gelyada la xidhiidha awgeed. Isaga oo ka baqayey in haddii uu arrintaas oggolaado bulshada Somaliland ku kici doonto.

Inkasta oo ay jireen xoogag ay wadaadadu hoggaaminayeen oo waxbarashada Ingiriiska ka soo horjeeda haddana, Badhasaabkii British Somaliland Sir Geoffrey Archer ee wakhtigaas waxa uu aaminsanaa in ay Boqortooyada ay waajib ku tahay in ay dadka xukunkooda ku hoos nooli wax baraan. Waxa kale oo uu aaminsanaa in ay Soomaalidu yihiin dad aad u maskax badan, ciyaalkuna ay xiiso weyn u qabaan in ay waxbartaan.

Haddaba, si arrintaasi ugu suurto gasho waxa uu go'aansaday inuu odayaasha reeraha (qabiilada) iyo waalidinta aan waxbarashada cuqdad weyn ka qabin uu hirgelinta waxbarashada u soo bandhigo si ay uga caawiyaan. Hase ahaatee, fekerkii Sir Geoffrey Archer, ma aanu socon ka dib markii Kommishankii maamulka lacagta ee Boqortooyadu diiday in uu lacag waxbarasho siiyo maamulkii British Somaliland.

Inkasta oo Sir Geoffrey Archer aad uga xumaaday in ay Boqortooyadu hor joogsatay fursaddii caruurta wax lagu bari lahaa, haddana dedaalkiisa in caruurtu waxbartaan kama hadhin, waxana uu fursad u helay in uu sanadkiiba ilaa lix arday (wiilal keliya) suudaan waxbarasho ugu diro. Run ahaantii wakhtigaas waxbarashada laga hadlayey tan wiilasha uun bay ku koobnayd.

Sanadkii 1928, Badhasaabkii cusbaa ee la keenay British Somaliland H.B. Kittermaster, dhinac ayuu isaga tuuray qorshihii hore ee Sir Geoffrey Archer oo aaminsanaa in caruurta wax la baro, wuxuuna Badhasaabka cusubi soo jeediyey in waxbarashada caadiga ah la iska daayo oo iskuun farsamo ah laga furo Hargeysa, kaas oo lagu baran doono cilmiga beeraha, farsamada gacanta, sida faaradda gacanta. Waxa kale oo uu is tusay, in waxbarashadan farsamada gacantu ay soo jiidan karto wiilal badan oo xiisaynaya waxbarasho noocaas ah, yaraynna doonta shakigii dadku ka qabeen in ciyaalka gaalnimo iyo dhaqan xumo la baraayo. Hase ahaatee, markii uu la tashaday gudigii Boqortooyada u qaabilsanaa Waxbarashada dalalka iyaga hoostaga gaar ahaan Suudaan oo iskuuladii Ingiriisku sameeyey si fiican u dhaqan galeen, waxa ay noqotay in habkii waxbarashada (system) ee suudaan la qaato.

Nidaamkaas waxbarasho ee Suudan waxa uu soo odhanayey in Madarasadaha Quraanka ee jira la xoojiyo, laguna daro xisaab, iyo in ay ardaydu Carabi qori karaan. Madarisadahaas oo wiilasha keliya loo oggolaa. Heshiiskuna waxa uu ahaa in ay dawladdu “British Somaliland” ay awood u leedahay in ay baadhitaan ku samayso tayada iyo sida iskuuladaasi u socdaan, laakiin aanay hab maamulkooda fara gelin. Waxana markii dambe caddaatay in uu yahay nidaam shaqaynaaya arday kalena lagu soo jiidan karo.

Markii dambena Iskuulkii Berbera ee dawladdu maamuli jirtey waxa manhajkii lagu daray maadooyin aan diini ahayn sida: Taariikh, Juquraafi, caafimaadka, Fiisigis iyo arrimaha bulshada. Ardaydiina waxa loo ballan qaaday in kuwa ugu fiican loo diri doono Gordon College oo Khartuum iyo Cadan ku yiilay. Iyada oo markaas lagu qiyaasay in ardaygiiba ay ku bixi doonto ilaa 1000 Giniga Ingiriiska ah.

Inkasta oo maamulkii British Somaliland ay si kastaba isugu dayeen in ay waxbarashada tayeeyaan, haddana waxa u muuqatay in aanay ardaydu waxbarasho taama gaadhi karin, ilaa dadka Soomaalidu ay iyagu dhexdooda isku raacaan in waxbarashadu caruurtooda faa’iido u leedahay. Arrintu si kastaba ha ahaatee, dad badani waxa ay u arkayeen, in aan maamulkii Ingriisku laftiisu aanu lahayn qorshe cad oo waxbarashada Somaliland hore loogu marinayo. Waxa kale oo dadka qaarkiis u arkayeen inaanu maamulkii British Somaliland ku jirin dad waxbarashada khibrad u leh oo qorshe waxbarasho oo la raaci kara keeni kara. Manhajka suudaan ee ay doorteenna waxa uu ula muuqday mid diinta lagu dhafay oo aanay dadku ka boodayn, balse aan tayo waxbarasho oo weyn lahayn.

Bishii April 1938 ayey Boqortooyadii Ingiriisku British Somaliland u magcawday Agaasimihii ugu horeeyey ee waxbarashada, Mr. R.E. Ellison. Mr. Ellison waxa uu ahaa nin feker cunsiriyadaysani ku jiro kaas oo aaminsanaa “in dadkan dhaqankoodu reer miyinimada ku dhisan yahay ay adag tahay in la baro, wax aan ahayn , waxa ay hore u yiqiineen.” Tusaale ahaan waxa uu yidhi “ ma dhici kartaa in nidaam waxbarasho oo qofka reer miyiga ah ka dhigi karta reer miyi intaas ka wanaagsan?”. Waxa kale oo uu yidhi “dadka reer miyiga ahi waa kuwa ugu xag-jirsan (conservative), aadna way u adag tahay in noloshooda wax laga bedelo.” Waxa kale oo uu intaas ku daray “ma Soomaali ayeynu bari karaa in ay jirto si geela ama adhiga loo ilaaliyo ama aqal Soomaali loo dhisto.?”

Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxbarashadii British Somaliland waxa ay si fiican u hirgashay, ka dib markii la soo magcaabay guddoomiye waxbarasho oo rasmi ah. Ninkaas oo la odhan jirey Mr. C. R. Bell, waxa uu dardar geliyey waxbarashadii wiilasha, waxana uu keenay nidaam cusub oo qorshaysan oo waxbarashada wax looga bedelayo. Waxana markiiba u muuqatay in nidaamka waxbarasho ee dalka ka jirtay ay ahayd mid liidata oo aan qorshe ku dhisnayn. Sidaas darteed, waxa uu xukuumaddii Boqortooyada Ingiriiska ka codsaday in dhaqaalaha waxbarashada lagu bixinayo la kordhiyo, si waxbarashadu macne u yeelato.

Qorshaha cusub ee Mr. C. R. Bell soo jeediyey waxa ka mid ahaa:

1) In Iskuuladihii hore lagu bedelo kuwo cusub, afar degmo oo kalena lagu daro, meelaha waxbarashadu ka jirto, tirada Dugsiyada Hoosena ilaa todoba kale lagu daro, kuwaas oo qaadi kara ilaa 410 arday (wiilal).
2) In la dhiso Iskuulo guryo loo hoydo leh {Boodhin} si ardayda meelaha fogfog ka yimi ay nolosha iyo waxbarashadu ugu fududaato. Iskuulkii ugu horeeyey ee Boodhin ahna waxaa 1944kii laga furay magaalada Sheekh, waxaana lagu bilaabay 26 arday.

Iskuuladaas maamulka Boqortooyadu gacanta ku hayey ka sokoow, waxa kale oo jirey ilaa 19 iskuul oo Quraanka iyo waxbarashada kale ee aasaasiga ah lagu barto oo ay dhigtaan 400 oo arday (wiilal). Inkasta oo Iskuuladu ka madax banaanaayeen maamulka Ingiriiska, haddana maadaama uu dhaqaale ahaan kabi jirey maamulku, waxa lagu samayn jirey kormeer si tayada waxbarasho loo ilaaliyo.

Waxa xusid mudan doorka uu ka qaatay Maxamuud Axmed Cali kobcinta iyo horumarinta waxbarashada Somaliland. Haddii aanu qayb ka ahayna, dhaqan gelinta waxbarashada wiil iyo habloba ma aanay suurtowdeen in bulshadu aqbasho waxbarashada Ingiriisku watay. Waxa uu ahaa nin wakhtigiisa horeeyey fahmeyna faa'iidada waxbarashadu leedahay. Waxa uu ahaa xudunta isku xidha waxbarashada casriga ah iyo bulshada. Maxamuud dadka reer Somaliland waxa ay u yiqiineen aabihii waxbarashada, markii Ingiriisku baxayna isaga ayaa maamulkii waxbarashada lagu wareejiyey.

## Waxbarashadii Hablaha

Dooda waxbarasho ee Ingiriiska iyo culumada Soomaalida ka dhex socotay, kuma jirin habluhu, waayo tacliin kale iska daayo, hablo Quraan dhigtaa way yaraayeen. Markii Mr. C. R. Bell waxbarashadii British Somaliland loo dhiibay ee uu si fiican u tayeey ka dib, ayaa xaaskiisa oo la odhan jirey Jane Bell, waxa ay weydiisay sababta hablaha waxbarashada loogu diidan yahay. Mr. C. R. Bell, oo og dariiqa dheer ee loo soo maray in Soomaalidu aqbasho waxbarashada Ingiriiska ee wiilasha keliya waxa uu xaaskiisa u sheegay in ay adag tahay, culumada iyo waalid Soomaaliyeed midna laga dhaadhiciyo in gabadhi waxbarato.

Ka dib dedaal dheer oo waalidiintii iyo qaar culumada ka mid ahaa ay sameeyeen, waxa markii dambe waalidiinta qaarkood oggolaadeen in ay hablahoodu waxbartaan. Ugu dambayntiina iskuulkii ugu horeeyey ee hablo wax ka bartaan oo Boodhin ah, ayaa magaalada Burco laga furay sanadkii 1953kii, kaas oo loo bixiyey **Burco Girls School** (Iskuulkii Hablaha ee Burco.)

Run ahaantii, haddii aanay iskuulkaas u dedaalin rag culumo iyo odayaalba ahi, marna ma suurtowdeen in la furo, waayo iyada oo awalba waxbarashada "gaalada" shaki dadku ka qabeen, haddana hablaha in iskuuladooda la geeyaa, dareen ka sii fog ayuu xambaarsanaa. Inkasta oo raggaas waxbarashad hablaha taageeray ay badnaayeen mid walbaana uu door gaara ka qaatay, haddana waxa xusid gaara mudan Xaaji Faarax Ismaciil. *Waxaa uu ahaa macallinkii ugu horeeyey ee hablaha dugsi quraan uga furay magaalada Burco ee taarikhda ku galay, taas oo keentay in isaga iyo Mrs Jane Bell oo iyana u dadaashay waxbarashada hablaha ay tilmaan u noqdeen Waxbarashada hablaha Soomaaliland, magacoodana lagu xardhay darbega aafaaka laga galo Burco Girls School.*

Raggaas dedaalka dheeraadka ah u galay, qaarkoodna habloodii ku daray iskuulka waxa ka mid ahaa:

1. Xaaji Ismaaciil Faarax
2. Xaji Baxnaan Xirsi (Gudidii Iskuulka )
3. Sheekh Cali Siciid (Sheekh Burco caan ka ahaa)
4. Faarax Cabdi Qodax (Suusle)
5. Yuusuf odowaa (Carmiye)
6. Xaaji Xasan Geelle
7. Xaaji Aadan Cabdi Yaaxeen

Raggaasi markii ay caddaysteen in ay waxbarashada taageerayaan, hablahoodana ku darayaan, bulshadii reer Burco si weyn ayey ugu kacday. Waxaa meel walba loola istaagay cay iyo fadeexayn iyaga oo dadku u arkayeen in gabadh iskuul gashay ay fadare iyo khasaare noqotay. Heesaha wakhtigaas reer Burco soo saareen waxa ka mid ahaa:
*Ninkii inankiisa iskuul ku darow wuxuu intifaaco adaa iska leh*
*Ninkii inantiisa Iskuul ku darow hadday ibtilowdo adaa iska leh.*

Sheekh Cali Siciid oo markaas ka mid ahaa culumada ugu waawyn ee magaalada Burco, markii uu iskuulka taageeray waxa ay noqotay wax dadkii qaadan kari waayeen. Waxana lagu eedeeyey in uu gaalo raac noqday, waxayna dadka qaarkood weriyeen in masaajid uu ka mas'uul ahaa, lagu yidhi ha isku iman. Cayda iyo dacaayadda Sheekha loo geystay cid kasta ayaa ka qayb gashay. Cali Xammaal oo ahaa nin Badmaax ahaa wax badana qurbe soo joogay, waxa uu ka mid ahaa dadkii Sheekha ka soo horjeestay. Waxana uu gabaygiisii "ma soo gaadhey, ku daray Sheekha:

*"Ma soo gaadhey gaal iyo wadaad gooni wada taagan"*

Inkasta oo Cali nin dhul badan maray ahaa, haddana waxa uu aaminsanaa in aan nin "caddi" aanu Soomaali asxaan wax ugu barayn ee uu dano kale ka leeyahay. Si kastaba, ha loo eedeeyo Sheekh Cali isagu waxa uu aaminsanaa Xadeethkii Nebegeena Maxamed (NNKHA) ee ahaa: *"Aqoontu ama Cilmigu waa wax waajib ku ah lab iyo dhidig intaba*".

Markii iskuulkii la furay 1953kii, waxa lagu bilaabay 24 hablood oo magaalooyinka Somaliland markaas ugu waaweynaa ka kala yimid. Nasiib darro dadkii reer Burco weji wanaagsan kuma qaabilin hablahaas yaryar. Inkasta oo markii odayaashii iyo wadaadadii oggolaadeen in Iskuul Burco laga furo, ay ku xujeeyeen maamulkii Ingiriiska in aan hablahaas Iskuulka dhigta wax rag ah, Soomaali iyo Ingriis waxay doonaanba ha ahaadaana loo keenin; marka laga reebo Macallin Diinta dhiga, haddana kacdoonkii iyo dacaayaddu marna ma yaraan, waayo waxa ay dad badani u arkayeen in iskuulkaasi yahay boog xun oo Burco ku taala.

Dacaayadda odayaasha iyo culumadii iskuulka taageeray lagu hayey, ka sokoow, markii iskuulkii la furay, waxa hablihii yar yaraa meel walba la isula taagey cay iyo dhagax; marka ay guryahoodii u sii socdaan ama iskuulka imaanayaan.

Maryan Xaaji Xasan Faarax, oo ardaydii Ceerigaabo ka timi ka mid ahayd, waxa ay tidhi *"sida na loo nacay, xataa hablaha xaabada sidaa, marka ay na arkaan inta ay xaabada dhulka dhigtaan ayey na shiidi jireen."* Raaqiya Xaaji Ducaale Cabdalla oo iyadu ahayd ardaydii ugu horraysay ee Burco iskuulka ka gashay, waxa ay tidhi *"waanu indhashareeran jirnay si aan naloo garan. Haddana si uun bay noo garan jireen, ka dibna dhagax ayey nagu miisi jireen. Illaahay ha u naxariistee Moxamed Halac oo ahaa Madaxa Ciidanka Boliiska ee waqtigaas ayaa noo sameeyey Boliis subaxdii na dhaafiya meesha ay ciyaalku joogaan."*

Afar iyo labaatankii hablood ee iskuulka lagu bilaabay waxa ka mid ahaa:

1. Maryan Xaaji Xasan Faarax Ceerigaabo
2. Canab Xaaji Xasan Faarax Ceerigaabo
3. Ruun Ismaaciil Jaamac Ceerigaabo
4. Raaqiya X. Ducaale Cabdalla Burco
5. Aamina X. Aadan Cabdi (Yaaxeen) Burco
6. Xaliimo Timir Cali Burco
7. Shukri Xaaji Axmed Burco
8. Kaltuun Iimaan Dhoore Burco
9. Jawaahir Cabdalla X. Faarax Burco
10. Faadumo Axmed Maxamuud Nuur Burco
11. Shamis Cismaan Xudhuun Boorama
12. Mako Jaamac Boorama
13. Faadumo Faarax Gurey Berbera
14. Faadumo Cumar Cali Jawhar Berbera
15. Faadumo Axmed Siciid Berbera
16. Amina X. Maxamed Jirde (Amina Weris) Sheekh
17. Khadiija Maxamuud Axmed Cali Sheekh
18. Xabiiba X. Maxamed Siraad Sheekh
19. Aamina Xuseen X. Xasan Sheekh
20. Saakin Jirde Xuseen Hargeysa
21. Ruun Maxamed Xuseen Hargeysa
22. Xaliimo Axmed (Yey) Ducaale Hargeysa
23. Sahra Aw Axmed Xasan Hargeysa
24. Aamina X. Ibraahim Cismaan (Basbaas). Hargeysa

Inkasta oo 24 kaas hablood iskuulka lagu bilaabay, haddana, qaarkood baa ka baxay Iskuulka sababo kale duwan awgeed. Waxaa iyaguna markii imtixaan laga qaaday safkii hore ku soo biiray:

| | |
|---|---|
| 1. Deeqa Jaamac Jibriil (Col-u-joog) | Ceerigaabo |
| 2. Khadiija Maxamed Jaamac (Carey) | Ceerigaabo |
| 3. Caasha Xaaji Diiriye | Burco |
| 4. Kinsi Cabdiqaadir Faarax | Berbera |
| 5. Shuun Siciid Salli-Dhige | Berbera |
| 6. Sucaad Qaasin (Yeminayad) | Berbera |

Inkasta oo aan dafcaddii ugu horeysay ee Burco Girls School halkan magacyadooda ku qoray, waxa aan shaki ku jirin in kuwii ka dambeeyey oo dhammi aanay qiimo ahaan kala dhicin. Waxaa kale oo xusid mudan in hablaha reer Berbera ee markii dambe ku soo biiray Iskuulka ay wax ka soo barteen macallimad reer Berbera ah oo Asha Walid la odhan jiray oo asalkeedu Carab ahayd oo wax weyn iyana ku kordhisay waxbarashada hablaha ee reer Berbera.

Iskuulkii Hablaha ee Burco waxa uu soo saaray intii uu furnaa, arday aan tayadooda iyo qiimahooda midna la qiyaasi karin. Gabdhahaasi waxa ay barteen xirfado kala duwan, waxana ay qabteen shaqooyin kala duwan sida: Macallimiin, maamulayaal iskuul, maamulayaal xafiisyo, adeegayaal caafimaad (Nurses), Wasiiro, Suxufiyiin, Saraakiil ciidan iyo qaar baayacmushtar galayba. Inkasta oo odayadii, culumadii iyo bulshada inteeda badaniba ka welwel qabeen in hablahaasi beloobayaan haddii ay gaalo wax u dhigto, haddana tacliintii ay barteen waxa ay siisay in ay naftooda qiimeeyaan oo ay kulligood noqdaan haween isku kalsoon oo dhaqankooda iyo diintooda xurmeeya.

Hablahaas in badan oo ka mid ahi waxa ay dibadda u tageen waxbarasho, waxana ay soo wada noqdeen iyaga oo aan dhaqankoodii iyo diintoodii midna waxba iska bedelin. Waxana ay ku sifoobeen maahmaahda adduunka intiisa badani isticmaasho ee ahayd "*haddii aad nin waxbartid isaga ayaa is anfacaya, haddiise aad gabadh waxbarted bulsho dhan ayey anfacaysaa*."

Gabdhahaasi markii ay tacliintoodii dhammaysteen guryana yeesheen, waxa ay noqdeen kuwo dadkoodii inta liidata hinjiya oo noloshooda kor u qaada. Guri kasta oo gabadh Burco Girls School ka soo baxday leedahayna waxa joogay

dhalinyaro waxbarata oo gurigoodu hoy u yahay. Waxa ay fahansanaayeen qiimaha ay waxbarashadu leedahay, waana sababta ay boqolaal kale guryahooda uga aflaxeen.

Sanadkii 1953kii oo ahaa markii Iskuulka Hablaha ee Burco la furay, waxa ka soo wareegtay 67 sano. Waxana aan dhihi karaa, raggii waagaas hablahooda iskuulka ka reebay iyaga iyo reerkooduba way tacab qasaareen. Waayo, waxa xaqiiqo aan la dafiri karin ah, inaan qof waxbartay iyo mid aan waxba baranini aanay sinayn.

Waxbarashada habluhu waxa aad u xoogaysatay oo ay sinaan waxbarasho oo hablo iyo wiilalba dhacday ama la gaadhey wakhtigii xukuumaddii Kacaanka ee Maxamed Siyad Barre. Waxaana gabadho badani galeen jaamacadihii waddanka ka jirey, in badanina waxa ay ka tusaale qaadanayeen hablihii Burco Girls School ka baxay ee horumarka gaadhey.

In kasta oo 67 ka soo wareegtay aasaaskii Burco Girls School, Waxa weli muuqata in dadkeenu sas ka qabo, waxbarasho dad ajinebi ahi (gaar ahaan caddaan) ay gacanta ku hayaan ama wax ka dhigaan. Taas macnaheedu maaha in aynu dafirsanahay, in aynu aragno midhihii ka dhashay hablihii Burco Girls School, iyo inay yihiin hanti qaran.

Intii aanan qoritaanka maqaalkan bilaabin, waxaan la hadlay dhawr gabdhood iyo wiilal oo hooyooyinkood ka mid ahaayeen hablihii Iskuulka Burco, waxaanan weydiiyey sida ay noloshooda u saamaysay in hooyooyinkood waxbarteen. Waxana ay isku raaceen, *in waxbarashada hooyooinkood aasaas u ahayd tacliintooda iyo heerka ay nolosha ay ka gaadheen*.

Sida cinwaanka maqaalkani ka turjumayo, hablahaas waxbarshadoodu, waxa ay noqotay ***ilayska*** iyaga iyo intii ehel iyo qaraabo ku xidhnaydba haga. In badan oo haweenkaas ka mid ah si fiican ayaan u aqaan. Waxa aan ogahay waxa ay galaan iyo waxa ay gudaan. Intii dhimatay Ilaahay ha u naxariisto, inta noolina waa hanti qaran, mudan in la xurmeeyo, taariikhna laga reebo.

**Tixraac**: EDUCATIONAL DEVELOPMENT AND ADMINISTRATIVE CONTROL IN BRITISH SOMALILAND
Author(s): Aderemi S. O. Fatoke
Source: Northeast African Studies, Vol. 3, No. 3 (1981-82), pp. 61-75
Published by: Michigan State University Press.